Xeerka L. 31 rep
Xeer ku saabsan diiwaanada ay haynayaan Kaaliyeyaasha iyo Gaarsiyeyaasha Dalka.

MAAMULKA WASAAYADDA SOOMAAALIYA EE TALYANIGA

MAMULAHA

Marka uu arkay xeerka 4 Nofember 1951. lamba. 1301 ee lagu ansixiyaya laguna fuliyay Heshiiska Ilaalinta Dalka Soomaliya;

Marka uu arkay xeerka nidaamka garsoorka ee lagu meelmariyay lamba. 5 rep taariikda 2 Febraayo 1956;

Marka uu garowsaday in xeer laga soo saro diiwaanada ay haynayaan Kaaliyeyaasha iyo Gaarsiyeyaasha Dalka;

Marka uu dhagaystay Golaha Maamulka;

Iyo soo jeedinta Agaasimaha Sharciyaynta ee AA. GG;

WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Kaaliyeyaasha xaafiisyada garsoorka Soomaaliya, marka laga reebo Dadweyne u Doodaha, Qaaliyeyaasha iyo Maxkamadda Qaaliga, waa in ay hayaan diiwaanada soo socda:

a) Arrimaha madaniga:
   1) Dowrka hawlaha garmaqalka, oo lagu qorayo dacwadaha Garsooraha la horgeeyo ama Qaybta, laguna soo koobayo caddaymaha dhinacyada iyo qaraarada la xariira garmaqalka. Dowrka hawlaha waxaa saxiixaya Guddoomiyaha ama Garsooraha iyo Kaaliyaha;
   2) diiwaanka lambarada taxana ee qaraarada iyo nuqulka asalka waraaqaha kale waa in lagu qoraa, marka la sameeyo, waraaqaha uu qoro Kaaliyaha ama lagu sameeyo soo dhexgalkiisa. Cirifka waraaq kasta waa in lagu muujiyaa lambarka isla waraaqdaas laguna qoraa diiwaanka taxana;
   3) diiwaanka waraaqaha la diiwangeliyo;
   4) diiwaanka kharashka la xariiraha arrimaha dadka ama wakaaladaha loo oggolyahay in ay xajistaan dayn (samballo madani ah iyo musalifnimada);
   5) diiwaanka wixii daqliga diibaajiyada-curaarta ee waraaqaha shaabadaysna iyo kharashka kaalinta;
   6) diiwaanka wixii baxa ee diibaajiyada ee ku xusan lambarka hore;
   7) diiwaanka guud ee diibaajiyada garsoorka;
   8) diiwanka amarrada diibaajiyada ee ku xusan lambarka hore;

b) arrimaha ciqaabta:
   1) diiwaanka xukunka, oo lagu qorayo marka lagu keydiyo Kaalinta, xukunada iyo dekereetooyinka dacwadaha ciqaabta. Cirifka warqadda asalka ee qaraar kasta waa in lagu muujiyaa lamabarka uu isla qaraarkaasu uu kaga yaallo diiwaanka;
   2) xasuus-qorka alif-ba'da ee lagu soo sheegay lambarka hore;
   3) diiwaanka ciqaabta lacageed iyo kharashka dacwadda (samballada ciqaabta);
   4) diiwaankha kharashka dawladda horumaris ahaan ay u bixisay.
   Ka sokow diiwaanada lagu soo sheegay lamabarada kore, kaaliyeyasha iyo gaarsiiyeyaasha lagu soo sheegay faqradda sare waa in ay hayaan:
      1) diiwaanka brotokolka isgaarsiinta (waraaqaha soo gala iyo baxa);

2) diiwaanka dhawrtada kaalinta.

Qod. 2

Ka sokow diiwaanada lagu soo sheegay qodobada sare, Kaaliyeyasha Garsoorayaasha Gobolka waa in ay hayaan diiwaanada soo socda:

a) arrimaha: madaniga:
   1) diiwaanka dowrka guud ee arrimaha lagu muransanyahay ee madaniga;
   2) diwaanka lambarada alifl-ba'da ee doorka lambarka hore;
   3) dowrka guud ee arrimaha madaniga ee aan lagu muransanayn;
   4) diiwaanka lambrada alif-ba'dada ee dowrka lambarka hore lagu soo sheegay;
   5) dowrka guud ee fulinta guurtada iyo maguurtada;
   6) diiwaanka lamabarada alif-ba'da ee dowrka guud ee ku xusan lamabarka hore;
   7) diiwaanka diibaajiga ku-meelgaarka ee loogu tartamayo naadada;
   8) diiwaanka dadweynaha ee musalifnimada;
   9) diiwaanka ilaalinta itaal-darrada iyo daryeelka da'yarta aan qaan garin iyo awood laawayaasha;
   10) diiwaanka dhaxalka;
   11) diiwaanka shirkadaha iyo shaqsiyadaha sharci (u gaar Kaaliyaha Garsooraha Gobolka Muqdisho);
   12) diiwaanka codsiyada, miinguurinta iyo qorraallada shirkadaha iyo shaqsiyadaha sharciga (gaar u ah Kaliyaha Garsooraha Gobolka Muqdisho);
   13) diiwaanka suntidda buugaagta ganacsiga iyo sharciyaynta saxiixyada;
b) arrimaha ciqaabta:
   1) diiwaanka guud ee arrimaha ciqaabta;
   2) xasus-qorka lambarada alifaba'da ee ku xusan lambarka hore;
   3) diiwaanka fulinta ciqaabta;
   4) diiwaanka lambarada alifaba'da lambarka hore;
   5) diiwaanka amarada qabashada la soo saaray;
   6) diiwaanka qalabka dacwad muujinta;
   7) Diiwaanka guud ee kaalinta Maxkamadda dambiyda Culus (u gaara kaalinta Garsooraha Gobolka Muqdisho);
   8) xasuus-qorka alif-ba'da diiwaanka ku xusan lambarka hore.

Qod. 3

Kasakow diiwaanada lagu sheegay qod.1, Kaaliyaha Maxkamadda Racfaanka waa in uu hayaa diiwanada soo socda:

a) arrimaha madaniga;
   1) diiwaanka dowrka guud arrimaha lagu muransanyahay ee madaniga (ee kala dhexeeya quwa loo asteeyay Garsoorha Gobolka);
   2) xasuus-qorka alifleyda dowrka lagu soo sheegay lamabarka hore;
   3) diiwaanka dowrka guud arrimaha madaniga ee aan lagu muransanayn (ee kala dhexeeye kuwa loo asteeyay Garsooraha Gobolka;
   4) xasuus qorka alifleyda dowrka lagu sheegay doorka lambarka hore;
b) arrimaha ciqaabta:
   1) diiwaanka guud ee arrimaha ciqaata;
   2) xasuus-qorka alifleyda diiwaanka ku xusan lamabarka hore;

3) diiwaanka qalabka dambi muujinta (kala dhexeeya midka loo asteeyaya Garsooraha Gobolka);
4) diiwaanka guud ee Kaalinta Maxkamadda Racfaanka Dambiyada Culus;
5) xasuus-qorka alif-ba'da diiwaanka ku xusan lambarka hore.

Qod. 4

Kasakow diiwanada lagu sheegay qod. 1, Kaaliyaha Maxkamadda Garsoorka waa in uu hayaa diiwaanada soo socda:

a) arrimaha madaniga;
   1) diiwaanka dowrka guud ee arrimaha madaniga, maamuulka iyo xisaabaadka;
   2) xasuus-qorka alifleyda dowrka lagu sheegay lambarka sare;
b) arrimaha ciqaabta:
   1) diiwanka guud ee durista dacwadaha ciqaabta;
   2) xasuuq-qorka alifleyda diiwaanka lagu sheegay lambarka sare.

Qod. 5

Kaaliyaha Dadweyne u Doodaha waan in uu hayaa diiwaanada soo socda:

1) diiwaanka brotokolka waraaqaha (soo gala iyo baxa);
2) diiwaanka guud ee arrimaha ciqaabta;
3) xasuus-qorka alif-ba'da diiwaanka lagu soo sheegay lambarka sare;
4) diiwaanka amarrada qabashada la soo saaro (kala dhexeeya Garsooraha Gobolka;
5) diiwaanka qalabaka dambi muujinta (kala dhexeeya midka loo asteeyay Garsoorha Gobolka;
6) diiwaanka fulinta ciqaabta (kala dhexeeye midka loo asteeyay Garsooraha Gobolka);
7) xasuus-qorka alifaba'da diiwaanka lagu soo sheegay lambarka sare.

Qod. 6

Gaarsiiyeyaasha waa in ay hayaan diiwaanada soo socda:

1) lamabarka diiwaanka madaniga;
2) lambarka diiwaanka ciqaabta;
3) diiwaanka qabashada/uruurinta.

Qod. 7

Qaaliyada waa in ay hayaan diiwaanada soo socda:

1) diiwaanka brotokoolka waraaqaha (soo gala ama baxa);
2) diiwaanka dacwadaha madaniga;
3) xasuus-qorka alif-ba'da diiwaanka lagu sheegay lambarka sare;
4) diiwaanka dacwadaha ciqaabta;
5) xasuus-qorka alif-ba'da diiwaanka lagu soo sheegay lambka sare;
6) diiwaanka guurka;
7) xasuus-qorka alifaba'da diiwaanka lagu sheegay lambarka sare;
8) diiwaanka furriinka;

9) xasuus-qorka alifaba'da diiwanka lagu soo sheegay lambarka sare;
10) diiwaanka warqadaha dhalashada;
11) xasuus-qorka alofaba'da diiwanka lagu soo sheegay lambarka sare;
12) diiwaanka warqadaha dhimashada;
13) xasuus-qorka alifaba'da diiwaanka lagu soo sheegay lambarka sare;
14) diiwaanka waraaqaha notaayada;
15) xasuus-qorka alibaba'da diiwaanka lagu soo sheegay lambarka sare.

Xaafiisyada ay ka hawlgallaan Qaalliyaal badan, diiwaanada lagu soo sheegay lambarada 2 iyo 4 iyo xasuus-qorada u dhigma waxaa loo qaybi karaa Qaalliyaal badan.

Qod. 8

Maxkamadaha Qaalliga waa in ay hayaan diiwaanada soo soo socda:

1) diiwaanka brotokoolka waraaqaha (soo gala ama baxa);
2) diiwaanka racfaanada madaniga;
3) xasuuq-qorka alifaba'da diiwanka lagu sheegay lambarka sare;
4) diiwaanka racfaanada ciqaabta;
5) xasuus-qorka alif-ba'da lagu soo sheegay lamabarka sare.

Qod. 9

Dhammaan diiwaanada lagu soo sheegay qod.1 illaa 6, ka hor intii aan la isticmaalin waan in Madaxa Xaafiiska Garsoorka ama Garsoore kale oo xaafiiska ka shaqeeya uu lamabareeyo iyo sunto warqad kasta bartankeeda; waa in lagu qoro waraaqaha idil, bogga ugu dambeeya, lambarrada ku yaalla bogagga bartankooda ee uu ka koobanyahay diiwaanku. Diiwaanada ku xusan qodobada 7 iyo 8 waxaa suntaaya isla qaabkaas Garsooraha Gobolka.

Qod. 10

Qaababka rasmiga ee diiwaanada lagu soo sheegay qodobada sare waxaa sii diiyaarinaya Xaafiiska Sharciyada iyo Arrimaha Garsoorka.

Qod. 11

Xaafiisyada, laga bilaabo taariikhda ay dhaqangalayso dekereetadaan waa in ay haystaan diiwaanada la isticmaali karo si waafaqsan xeerka cusub illaa ay ka idleeyaan, iyagoo si habboon ula qabsanaya kolba isbadalka lagu sheegay dekeretadaan.

Qod. 12

Dekereetaan waxay dhaqangalaysaa marka ay ka so wareegto 60 cisho marka lagu baahiyo Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 24 Feberaayo.

Maamulaha

Anzilotti

Waan arkay iyo laga diiwaangaliaya – Diw. lamba 15 – Bogga lamba. 41

Mogadisho, 23 Maarso 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro.**